



Warbixinta Kormeeraha Guud ee ku socota Guddiga (Qoraalka)

Maarso 9, 2021

Galab wanaagsan, Agaasimayaal, cawaysin wacan qof walba oo dhageysanaya fiidnimadan.

Maalmahan lasoo dhaafay waxay ahayeen kuwaa layaableh oo carqalad ku ah Degmada – toddobaadyada soo socdana waxay nooga baahan doonaan inaan sii wadno inaan ka faa'iideysanno xooggeenna shakhsi ahaan iyo urur ahaanba.

Waad ku mahadsantahay Gudoomiyaha bayaankaaga furitaanka kulanka caawa iyo hadalka Wakiilka Ardayda Shue.

Marka hore, waxaan rabaa inaan u xaqiijiyo Gudiga iyo bulshada inaynaan weli ka niyad jabin ficilkii xumaa ee dab qabadiinta iyo burburka hantiyeed dhacday fasaxii todobaadka la soo dhaafay.

Waxaan nadiifinay burburka, nasiib wanaagna qofna wax kuma noqon. Waxaan rabaa inaan amaano shaqaalaheena, kooxaheena amniga iyo ilaaliyaasha, iyo Dab-damiska & Badbadaada sida ay ugu heellan yihiin badqabka dugsiyadeenna iyo ardaydeena.

Wixii dhacay subaxnimadii hore ee Sabtida nagama hor istaagi doonaan inaan qabano shaqadeena, iyo inaan gaarno hadafkeena. Horey ayaan u sii socon doonnaa.

Ubaahnaanshaha in aan is muujino waxay ahayd mawduuc joogto ah inta lagu gudajiray aafadan.

Anagoo kujirna sanad aad u adag, waligeen ma hilmaamin wixii muhiim inoo ah, oo ay kujirto muhiimada sinaanta jinsiyadeed iyo in aan nidaamkeena sare ugu qaadno dadka laga tira badan yahay - iyadoo aan qirayno in jab iyo saameyn ku yeeshay ardayda, qoysaska iyo bulshadeena.

Ardaydeenu waxay u baahan yihiin in shakhsi ahaan la arko oo la maqlo, waxbarashadooda awgeed iyo shucuurtooda bulsheed iyo fayd qabkooda maskaxeed. Mida ugu muhiimsan, in badan oo kamid ah ardaydeena ayaa ubaahan waxbarid gaar ah iyo adeegyo shakhsian.

Waxaan sidoo kale ognahay in dhammaan dadaalkeenna barashada muuqaalka ah ay tahay mid aan marwalba ugu talagalnay inay noqoto ku meel gaar.

Haatan waxaa Gudoomiyaheena naga codsanayaa inaan dib u furno.

Faahfaahinta amarka fulinta ee gudoomiyaha, oo aan wali si rasmi ah loo soo saarin, wali way soo socdaan. Wali waan ka shaqeeynaynaa qaabka aan uga jawaabno.

Intaan *ayaan* ognahay:

Qorshuhu wuxuu ku yimaadaa laba weji: dugsiyada K-5 waxay soo laaban doonaan asbuuca Maarso 29. Fasalada 6 ilaa 12 waxay dib u furmi doonaan bartamaha Abriil.

Rajada cusub ee gudoomiyaha run ahaantii wuxuu na siinayaa in kabadan labo asbuuc aan ku dhammaystirno moodooyinka waxbarista iyo dhammaan qorshooyinka hawlgalka ee faahfaahsan ee lagama maarmaanka u ah soo dhoweynta ardayda ee dib ugu soo noqoshada dhismayaasha dugsiya. Run ahaantiina, haddii aad ka fekerayso nasashada guga, waxaan hadda inoo dhiman **siddeed maalmood** si aan u dhammayno waxaan oo dhan.

Weli wax badan baa u baahan in la qabto. Laakiin diyaar ayaan noqon doonaa. Waxaan ogsoonahay inay badqab nagu tahay in shakhsi ahaan aan dib u furno, ama iskujirka, waxbarasho muuqaal ah iyo mida shakhsiyeed.

Tan ilaa bilowgii aafada, waxaan ku adkeysanay inaan ku saleyno go'aanadeena dib-u-furida ujeedooyinka cabiraadda caafimaadka ee dugsiyada.

Qiyaasta muhiimka ah ayaa ah 14-maalmood qadarka isugeynta, iyadoo lagu saleynayo tirade baaritaanka 100,000 ee degganeyaasha bulshada ah ee laga helay cudurka.

Qiimayaashani waxay muujiyeen horumar joogto ah. Dhab ahaantii, qiimayaashu waxay dhawaan ku dhacay hoos u dhac marinka isku dhafka dugsiya iyo dib u furidda shakhsiyana.

Kalsoonida shacabka ayaa si cad kor ugu kacaysa iyadoo heerarka kiisaska ay hoos u dhacayaan. Inta badan qoysaskeena caafimaadka qaba, oo ay kujiraan qoysaskeena midabo kala duwan leh, waxay muujiyeen inay rabaan nooc ka mid ah waxbarashada shakhsiyana guban.

Marka, iyadoo lagu saleynayo cilmiga, iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka, horay ayaan u socon karnaa -- waxaanna u sameyn doonaa si taxaddar leh.

Waxaan rabaa inaan idin la wadaago sida aan isugu diyaarinay fursadan.

Waxaan rabnaa in qof walba uu dareemo kalsooni inaan qaadnay talaabooyinka lagama maarmaanka ah si aan ugu soo dhaweyno ardayda iyo shaqaalaha dhismayaasheena.

Marka ugu horreysa: Qaar badan oo ka mid ah macallimiinteena iyo shaqaalaha kale ee ardayda la shaqeeyaa waxay fursad u heleen in la tallaalo waxayna bilaabeen hawshaas. Tallaalku waa habka ugu macquulsan ee suurtagalka ah ee looga fogaan karo qaadista ama faafinta COVID-19, waana heli karaan dhammaan shaqaalaha ardayda la shaqeeyaa.

Mida labaad: Waxaan bilaabay inaan wax ka qabanno arrimaha hawo-qaadashada iyo socodka hawada gudaha dhismayaasheena. Meel kasta oo suurtagal ah, waxaan dugsiyada ku casriyaynay qalabyada HVAC, waxaan kordhinay hawo qaadashada daaqadaha, waxaanna dhammaan goobaha waxbarashada ku maalgashanay sifaynta hawada.

Kuma laaban doonno qaabka aan u farisaan jirnay fasallada sidii aan weligeen u farisaan jirnay, laakiin waxaan ku laaban doonaa goobo ammaan ah oo wax lagu barto oo loogu talagalay inay kaafiso baahiyaheenna iyo shuruudaha aan hadda ku jirno.

Mida saddexaad, waxaan **mar hore** waxbarashada shakhsiyeed ee xadiddan dib ugu furnay qaar ka mid ah dhismayaasheena. Waxaan haynaa in kabadan 85 dugsi oo horeyba u shaqeeynayaan oo ugu yaraan qayb kamid ah ardayda oo tiro xadiddan ay dhiganayaan maalinta.

Waxaan furnay barnaamijyada ciyaaraha dugsiyada, kuwaas oo ku shaqeeya qaab badqab ah. Dhammaadka toddobaadkan, dhammaan dugsiyadeena waxay ku shaqeyn doonaan barnaamijyo shakhsiyadeed oo xadiddan.

Wax badan ayaan ka baranay dadaaladan bilowga ah. Waxaan isbedel ku sameynay qaabeynta fasalka waxaana ka shaqeeynay hab maamuusyo. Isla markana, waxaan aqoonsan nahay in dugsi kasta uu ka duwan yahay kuwa kale waxaana u baahan doonaa habab kala duwan. Laakiin yoolalka waa isku mid: xaqiijinta jawi waxbarasho oo badqab ah iyo joogtaynta sii wadashada waxbarashada. Taasi ayay ardaydeenu ubaahanyihiin, macalimiinteenu ay ubaahanyihiin, bulshadeenuna waxay siiwadeyso taageerida.

Tallaabooyinkeenna dib-u-furista ayaan wali ka shaqeeynaynaa.

Wali mahaysano dhammaan faahfaahinadda.

Laakiin dhammaan shaqaalaha la shaqeeynayaa ardayda waxay heli karaan tallaalo.

Waxaan soo iibsanay oo qeybineynaa agab iyo qalabyada badbaadaada oo dheeraad ah. Waxaan qeexnay oo hirgelinay hab-maamuusyo caafimaad & badbaado leh.

Waxaan haysana hagidda hay'adaha caafimaadka si aan ugu wargalinno qorshayaasheena.

Iyo..... waxaan nahay **barayaasha**. Waan ognahay sida loo taageero ardaydeena iyo guushooda. Taasina waa hantida ugu muhiimsan ee aan haysanno. Taasina waa hantida ugu muhiimsan ee aan haysanno.

Asal ahaan, bulshada dugsiya kobcaya waxay ku saabsan tahay xiriirada wanaagsan ee ka dhexeeya ardayda, barayaasha, iyo qoysaska.

Marka waxaan uga mahadcelinayaa qof walba taageerooda, dabacsanaantaada joogtada ah, iyo rabitaanka inaad laqabsato sii wadida laqabsiga caqabada horteena intaa aan ku heellan nahay la shaqaynta ardayda oo aad nala dabaaldegtu ku soo noqoshada dugsiya caruurteena iyo dhalinyarada qaangaarka ah. Tani waxay noqon doontaa nooc cusub oo ah maalinta koowaad ee dugsiya, oo leh nooca dareenka dabiiciga ah ee xiisaha leh ee la yimaada asxaabtaada iyo fasallada cusub.

Waxayna muhiim u noqon doontaa dhammaanteen...sidoo kale waan ku qanacsanahay hadaladii uu ka hadlay khudbad jeediye iga horeeyay -in aan diirada saarno inaan ka dhigno mida ugu wanaagsan soo dhaweynta khibrada dugsiya... iyo ardaydeena.

Shaqaalaha waxay wadaagi doonaan faahfaahin dheeraad ah iyo cusboonaysiinta la xiriira dib-u-furidda dugsiya goor dambe marka ajendaha laga hadlayaa.

Ugu dambayntiina, waxaan sidoo kale doonayaa inaan ogeysiino dhagaystayaasheenna iyo bulshadeenna, in Haddii aad hadda tagtaan booga degmadeena, waxaad arki doontaa boor cusub oo ah "PPS Re Open"; waxaa halkaas ku daawan doontaa heerka sii kordhaya ee isgaarsiinta hufan iyo faahfaahinta halkaas lagu qoray ee ku saabsan dhammaan waxyaabaha la xiriira dib u furidda dugsiyadeenna.

Mahadsanid.